# SHARCI IYO BOOLIIS: MUXUU BOOLIISKU SAMMEYN KARAA IYO MUXUUSAN SAMMEYN KARIN?

## KA KOOBAN


Baaridda/Hubinta aqoonsiga: ........................................ 2

Maluumaad: ........................................ 3

Baarid (Boorsada dhabarka, Dharka iwm.): ........................................ 4

Baarid guri: ........................................ 5

Xirid: ........................................ 6

Maxaa la sammaynayaa haddii boolisku qalad sameeyo: ........................................ 7

## Baaridda qofka/Hubinta aqoonsiga:

**Tusaale**: Booliska ayaa anoo waddada iska maraya sabab la'aan i weydiinaysa aqoonsigayga. Ma sameyn karaan sidaas?

Boolisku wuu ku weydiin karaa aqoonsigaaga si ay u ogaadaan qofka aad tahay.

Laakiin si ay taas u sameeyaan waxay u baahan yihiin oggolaasho sharci ah.

Sababahaasina (§35 SPG, §36 BFA-VG, § 34 FPG) waxay kala yihiin:

- Haddii Boolisku aaminsan yahay in aad dambi soo gashay, waa in aad magacaaga, taariikhda dhalashadaada, jinsigaaga, meesha aad ku dhalatay, shaqadaada, cinwaanka gurigaaga u sheegtaa. Uma baahnid in aad macluumaad intaas ka dheer u sheegtid.
- Haddii aad sheegi kartid qof kale oo dambi galay, waa in aad Booliska u sheegtaa magaca, taariikhda dhalashada iyo cinwaanka guriga kaliya. Wax intaas ka badan ma ahan in aad u sheegtid.
- Haddii uu Boolisku ogaado in aad si sharci darro ah ku joogtid Austria (tusaale ahaan, haddii la go'aamiyay in aad dalka ka baxdo ama aad soo gashay Austria adigoon oggolaansho haysan) waa in aad Booliska u sheegtaa magacaaga, taariikhda dhalashadaada, wadanka aad ka soo jeeddid, ama haddii aad waddan la'aan tahay, iyo cinwaanka guriga aad ku nooshahay. Wax intaas dhaafsiisan waa in aadan u sheegin.
- Boolisku wuxuu sidoo kale hubin karaa xarumaha tareennada iyo tareenada wadamada kale u socda si ay u ogaadaan aqoonsiga qofka.
- Intaa waxaa dheer, boolisku waxay hubin karaan aqoonsigaga haddii ay aaminsan yihiin inaad khatar ku tahay dadka kale, xaaladdaada caafimaadka dhimirka awgeed. Waa inaad booliiska u sheegtaa magacaaga, taariikhda dhalashada iyo cinwaanka gurigaaga.
- Boolisku wuu baari karaa carruurta aan qaan gaarka ahayn haddii ay rumeysan yihiin in ay gurigoodii ka tageen ama ka baxsadeen.

**Dhammaan xaaladahaan waa waajib in aad aqoonsigaaga tustid booliska!**

Si kastaba, boolisku waa in ay sharaxaad ka bixiyaan sababta ay sidaas ugu malaynayaan! Sharci ahaan ma sameyn karaan sidaas, sababtoo ah qofka ayaan ku hadlin luqadda Jarmalka ama wadan kale oo uu ka soo jeedo darteed.

**TALO:** Haddii boolisku ku waydiiyo aqoonsigaaga, waydii in aad ku QASBANTAHAY in aad dhiibto aqoonsigaaga. Haddii ay kugu dhahaan waa qasab, waydii sabab cad, (qoro oraahyada ay ku dhahaan). Waydii namberka aqoonsigiisa/geeda shaqada.

## Macluumaad:

**Tusaalaha 1:** Banaanka ayaan kula kulmayaa saaxiibaday, booliska ayaa inoo yimid oo na waydiinaya waxa aan halkaas ka sameynayno .

**Tusaalaha 2:** Booliska ayaa albaabka guriga nagu soo garaacay, wuxuuna na waydiiyay haddii aan qorshaynayno ku laabashada wadankeenii.

Su'aalahaani waxay badanaa la xiriiraan hubinta aqoonsiga, waxaase jira xeerar kale oo la falgala. **Asal ahaan, macluumaadka nolosheena gaarka ah waa in la xafidaa, xitaa marka booliska loo eego, iyadoo la raacayo xeerka ilaalinta xogta (§ 1 DSG)!**

Boolisku waa heli karaa macluumaad ka nolosheena gaarka ah ku saabsan, sida (kumaan la kulmayaa, maxaan halkaas ka qabanayaa, maxay yihiin qorshayaashayada mustaqbalku). Tusaale, haddii ay kuu arkaan in aad hayso macluumaad ah

- dambi dhacay
- soo galid sharci darro ah ama joogitaanka wadanka qof aan ahayn muwaaddin Austrian ah.

**Laakiin:** Bixinta xogtu waa **ikhtiyaarkaaga** booliskuna waa inuu si cad u raaco xeerka (§54 SPG, § 33 FPG)**! Haddii aanan dooneyn in aan u jawaabo boolisku iguma qasbi karo!**

**TALO:** Haddii boolisku ku waydiiyo, waxa aad hadda qabanayso, ama tusaale, haddii aad qorshaynayso ku noqoshada dalkaagii, waydii sababta ay u rabaan in ay ogaadaan taas.

Waydii in aad ku QASBAN TAHAY bixinta xogtaas, si cad ugu sheeg, in aadan dooneyn bixinta xogtaas. Waydii sabab cad oo ay kuu weydiinayaan, (Ha kuu qoraan qodobbada) kana codso in ay ku siiyaan lambarkooda aqoonsiga shaqada.

## Baaritaanka  (Boorsada dhabarka, Dharka iwm.):

**Tusaale:** Booliska ayaa ii yimid,waxayna doonayaan in ay boorsadayda/shandadayda dhabarka baaraan, sidaas ma sameyn karaan?

Boolisku waa baari karaan aniga iyo boorsadayda dhabarka (sidoo kale shandada iwm) haddii ay i xiraan ama haddii …

- Anigoo dambi sameynaya la igu qabto.
- Boolisku ay doonayaan xaqiijinta faldambiyeed dhacay ayna muhiim tahay in la i baaro.
- Boolisku ay u maleeyaan in aan haysto agab mamnuuc ah (§ 40 SPG) (sida hub, daroogo iwm). → **Tuhunku wuxuu  u baahantahay sabab!**

**Talo:** Marka uu boolisku doonayo inuu boorsadaada baaro, ugu horreyn waydii sababta ay arrintaani ku timid. Waydii in aad ku qasban tahay inaad baaritaankaan u hoggaansanto. Ha noqonin qof baaridda ka soo horjeeda laakin si cad ugu sheeg iinaadna doonaynin in ay dhacaan wax aadan raali ka ahayn! Ogow sabab cad (ku dheh ii qora waxa aad igu haysataan), waydiisana lambarka shaqada ee askariga booliska ah.

# Baarid guri:

**Tusaale:** Booliska ayaa guriga igu soo garaacay, waxayna doonayaan inay gudaha usoo galaan, sidaas miyay sammayn karaan?

Sharciyan gurigaagu waa **meel adiga kuu** gaar ah, waxaana la gali karaa marka uu milkiiluhu oggolaado (xaqa guriga) laakin waxaa jira xaalado gaar ah:

Waxaan booliska u oggolaan karaa inay gurigayga soo galaan marka:

-Haddii la iigaga shakiyo in aan waxyaabo sharci darro ah ama wax qatar ah sammaynayo ama ay jiraan (§ 39 SPG)

**Tusaale:**

- Haddii qof caawin u baahan uu guriga ka dhex qeylinayo **( § 39 SPG)**

Ama sidoo kale:

- Marka la tuhmo in ugu yaraan saddex qof oo aan Austariyaan ahayn oo sharci darro dalka ku jooga ay gurigaaga ku jiraan **(§ 36 FPG)**
- Haddii la tuhmo in qof si sharci darro ah oo aan raali laga ahayn uu ganacsi ugu jiro (§ 36 FPG).

Ama

- Marka uu Boolisku haysto ammar ay maxkamadi anxisisay oo ka soo baxay xafiiska xeer-ilaalinta/dambi oogista ama hay'adda BFA ama hay'ado kale oo dowladeed.

➔ **Soo koobid: Haddii uu dhaco dambi ay tahay in si DEGDEG looga hortago ama qof noloshiisa/caafimaadkiisa qatar ku ah, ama boolisku ay haystaan caddeyn maxkamad, BFA ama hay'ad kale oo dowladeed ka timid,** Boolisku sidoo kale wuu ku waydiin karaa in uu sabab la'aan gurigaaga soo galo. Markaas waad u diidi kartaa in ay soo galaan!

**Talo:** Marka uu boolisku doonayo inuu gurigaaga soo galo waydii ugu horreyn sababta iyo in ay haystaan oggolaasho maxkamadeed ama ogolaasho hay'ad kale oo dowladeed. Sidoo kale waydii in **aad ku qasban tahay** in aad booliska u oggolaatid in ay guriga soo galaan. Si cad ugu sheeg mar kale inaadna u oggoleyn in ay baaran guriga laakin haka hor istaagin. Waydii in ay kula wadaagaan sabab cad (ay kuu qoraan qodobbada sharciga) askariga booliska ah waydii lambarkiisa aqoonsiga shaqo.

# Xirid:

**Tusaale 1**: Booliska ayaa kuu sheegay inaad timaamid saldhigga booliska!
**Tusaale 2:** Booliska ayaa ku soo wacay, waxayna kuu sheegeen inaad timaadid saldhigga booliska oo aad warbixin dhiibtid.

Sida caadiga ah: Haddii boolisku ku yiraahdo waa inaad **qasab nagu raacdid** waxay ka dhigan tahay xarig.

Haddii boolisku ku xiro qodobbada soo socda ayaa muhiim ah:

- Waxaad xaq u leedahay qareen/abuukaate. Adeegga qareennada heeganka ah ee eedeysanayaasha la soo xiray ee ay bixiyaan Ururka Qareennada Austira waxaa laga heli karaa waqti kasta (24/7) taleefoonka lamarkiisu yahay **0800/376 386**, waana lacag la'aan ama bilaash.

**TALO:** Haddii boolisku ku yiraahdo immow saldhigga booliska waydii in lagu **xirayo iyo inaad ku qasban tahay**. Haddii ay jawaabti HAA tahay, haka diidin si dhaqse ahna ula xiriir qareenka adeegga degdegga ah. Haddii Boolisku ku yiraahdo waad immaan kartaa saldhigga laakin kuma qasbanid, ka codso inay qoraal ahaan kuugu soo diraan waxa ay rabaan, isla markaana raadso talo sharci.

- Haddii aad diidid amarka booliska waxay kugu noqon kartaa dambi dheeraad ah oo ay ka dhalan karto ciqaab.
- Waxaad xaq u leedahay in laguu sheego macluumaad ku saabsan sababta xarigga
- Boolisku waa qasab in ay kuu sheegaan sababta laguu xiray iyo macluumaadka xaqa iyo waajibaadkaaga (warqadda macluumaadka oo ku qoran luqad la fahmi karo)
- Kuma qabsanid inaad xog siisid booliska, xaq ayaadna u leedahay in aad ka aamustid.
- Saxiix qoraallada aad fahantay ee aad raaliga ka tahay oo kaliya

Boosliku marka uu ku waydiiyo **IN AAD AWOODID** waa casuumaad **aan rasmi ama waajib ahayn.**

Waxa la sammaynayo haddii uu boolisku qalad sammeeyo:

1. **Tallaabada Koowaad: Diiwaan galin**

*Duub/sawir*

Waa la oggol yahay in booliiska howlgalka ku jiro **la duubo ama sawirro** laga qaado. Boolisku qofna uma diidi karo inay sidaas yeesho.

Digniin ku baahinta Internetka: Caadiyan lama oggola in sawirrada ama muuqaalladaas warbaahinta bulshada (Instagram, Facebook iwm) lagu baahiyo. Laakin waxaa jira xaalado gaar ah! Ka hor inta aadan baahin waxaa laguugu waaninayaa inaad la xiiriirtid xarun la talin.

*Marqaatiyo*

Mar kasta waxaa wanagsan inaad meel aad kala soo xiriiri kartid ka qaadatid dadka goobjoogga u ahaa marka uu boolisku qaladka sammaynayay ee doonaya/awooda inay ka marqaati kacaan arrintaas.

*Lambarka aqoonsiga Sarkaalka Booliska*

Mar kasta qoro lambarka aqoonsiga sarkaalka booliska (7 lambar); waa ku waajib in ay kula wadaagaan ( 9 RL-VO).

*Xusuuso*

Marka ay dhammaato xaaladdu ama dhacdadu, qor dhammaan faahfaahinta. Maxaa dhacay, goorta iyo goobtaba? Yaa joogay? Boolisku muxuu yiri? Adigu maxaad ugu jawaabtay? Muxuu sammeeyay boolisku? Sideed dareentay intii ay arrintu ama dhacdadu socotay, sideese dareemaysaa hadda?

*Dhawaacyo iyo waxyeello kale*

Haddii ay dhaawacyo ku soo gaareen, sawirro ka qaad degdegna u aad dhaqtarka si loo diiwaan galiyo dhaawacyada.

Haddii waxyeelo loo gaystay alaabtaada ama hantidaada, sawir ka qaad, melena dhigo.

2. Tallaabada labaad: Raadso caawin iyo talo

Sida ugu dhaqsiyaha badan, la xiriir xarun la talin si laguugu sharraxo tallaabooyinka sharci ee kuu furan.

Waaxda **Diakonie Rechts- und Sozialberatung** ayaa ku caawin karta!

Xarumo latalin oo dheeraad ah.:

**ZARA dhiirigaliyaha madaniga ah ee ka hortaga takoorka shaqada** TelNr. +43 1 929 13 99
Email: office@zara.or.at

**Xarunta diiwaangelinta takoorka ka dhanka ah muslimiinta (Dokumentationsstelle Islamfeindlichkeit und antimuslimischen Rassismus )**
TelNr. +43 676 40 40 005
Email: office@dokustelle.at

3. Tallaabada saddaxaad: Cabasho gudbi

Marka ay booliska idin dhex marto dhacdo, waxaad haysataa lix toddobaad si aad uga cabatid! Si Guud: Inaad degdeg u raadsatid caawinaad sharci ayaa wanaagsan. Markaas, caddeymaha waa la heli karaa, go'aanka cabashadana waxaa lagu gaari karaa waqti ku habboon.